IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية — الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 1da Jannaayo 1986 L. 1

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

[illegible] — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 1 ee 20 Dis. 1985, Dhismaha Wakaaladda Shamiitada Berbera. Bog; 2

SHARCI L. 2 ee 1da Jen. 1986, Oggolaanshaha Miisaaniyadda ku talo galka Dawladda ee Sannadka 1986. » 14

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

QAYBTA SADDEXAAD

DAWLADDA HOOSE MUQ. 6.5.84, Naado Dhul J.le Maslax Maxamed Siyaad L. 530 » 16

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

DAWLADDA HOOSE MUQ. 6.5.84, Naado Dhul J.le Maxamed Saciid Xersi L. 531 » 17

DAWLADDA HOOSE MUQ. 6.5.84, Naado Dhul J.le Cabdullaahi Maxamed Siyaad L. 532 » 18

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Caasha Maxamed Kaatun L. 533 » 19

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Cabdullaahi Ceelaabe Warsame L. 534 » 20

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Ismaaciil Saciid Cosobie L. 535 » 21

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Yuusuf Cismaan Culusow L. 536 » 22

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Salaad Cali Warsame L. 537 » 23

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Cali Maxamed Xaaji Muuse L. 538 » 24

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Rooble Xasan Maxamed L. 539 » 25

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Seynab Xaaji Cilmi L. 540 » 26

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Cadde Suufi Maxamed L.541 » 27

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.4.84, Naado Dhul J.le Shirkadda Dhismaha Xamar L. 542 » 28

QAYBTA KOWAAD

Sharci lambar 1, taariikh 20 Dec. 1985: Dhismaha Wakaaladda Shamiintada Berbera.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QAYBTA KOOWAAD
MABAADI' GUUD

Qodobka 1aad
Dhismaha

1. Waxaa la dhisay Wakaaladda Shamiintada Berbera oo hadda kaddib lagu magacaabi doono WAKAALADDA.

2. Wakaaladdu waa hay'ad madax bannaan waxayna leedahay jiritaan sharci ah.

3. Wakaaladda waxaa lagu meeleeyey darajada «A», waxayna yeelaneysaa dhammaan xuquuqda ay darajadaasi leedahay..

Qodobka 2aad
KORMEERKA

Wakaaladdu waxay hoos imaaneysaa Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga oo siinaya tilmaamo isagoo u marinaya Guddiga Agaasinka.

Qodobka 3aad

Xarunta iyo Laamaha Wakaaladda

Xarunta Wakaaladdu waa Muqdisho waxayna awood u leedahay in ay ka dhisato unugyo, laamo ama xafiisyo Degmooyinka kale ee Dalka iyo Dalalka shisheeye, haddii loo baahdo.

Qodobka 4aad
Ujeeddooyinka

Ujeeddooyinka Wakaaladdu waa;

— Ka qayb qaadashada horumarinta dhaqaalaha Dalka;

— Hawlgelinta wax ku oolka ah ee Warshadda Shamiintada Berbera si loo gaarsiiyo heerka ugu sarreeya ee wax soo saarka;

— Soo saaridda shamiinto, nooca loo yaqaan «Portland cement» si loo daboolo baahida Dalka gudihiisa, dheeriganna dibedda loogu dhoofiyo;

— Ku iibinta shamiintada. Warshaddu soo saarto sicir tartan gali kara isla markaana Wakaaladda u ballan qaadaya faa'iido dhaqaale;

— Xoojinta, dhiirrigelinta iyo horumarinta sameynta shamiintada.

Qodobka 5aad

Awoodaha

Wakaaladdu waxay leedahay awoodaha soo socda:

1. In ay yeelato, beddesho kuna dhaqanto tilmaamaheeda ganacsi iyo waxyaabaha ay curiso iyo in ay wax siiso waxna ku qaadato magaceeda si sharciga waafaqsan.

2. In ay yeelato shaabad ku qoran magaceeda Sharciga ah, kuna dhaqanto iyadoo leh awood heshiis oo buuxda oo ku saabsan amaah qaadasho iyo bixinba. Waxay kaloo awood u leedahay in ay iibsato hanti guurta ah iyo kuwo kaleba ama ay wareejiso kuwa Wakaaladda.

3. In ay yeelato diiwaan xisaabeed oo habboon iyo in ay dejiso xeer-hoosaadyo la xiriira maamulka toosan iyo kormeerka xisaabaha, maaliyadda iyo wax soo saarka Wakaaladda.

4. In ay magaceeda dacwad ku oogto, iyadana la dacweyn karo.

QAYBTA LABAAD

QABBKA DHISMAHA

## Qodobka 6aad

## Xubnaha Wakaaladda

Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Xubnaha soo socda:

- Guddiga Agaasinka;
- Guddoomiyaha;
- Maareeyaha Guud iyo
- Guddiga Maamulka.

## Qodobka 7aad

## Dhismaha Guddiga Agaasinka

Guddiga Agaasinku wuxuu ka kooban yahay Xubnaha soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka | Guddoomiye; |
| 2. | Wakiil ka socda Wasaaradda Warshada iyo Ganacsiga | Xubin; |
| 3. | Wakiil ka socda Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha | Xubin; |
| 4. | Wakiil ak socda Wasaaradda Maaliyadda | Xubin; |
| 5. | Maareeyaha Guud ee Wakaaladda | Xubin-Xoghaye. |

## Qodobka 8aad

## Xilka Guddiga Agaasinka

1. Guddiga Agaasinku waa hay'adda ugu sarreysa hoggaaminta Wakaaladda, wuxuuna qabtaa xilalka soo socda:

- Oggolaanshaha ku talo galka miisaaniyadda caadiga ah iyo xisaabxirka Wakaaladda ka hor inta aan loo gudbinin Wasiirka;
- Oggolaanshaha qorshaha iyo habraaca hawlgalka iyo qiimeynta wax soo saarka Wakaaladda;
- Dersidda warbixinnada muddada leh ee ku saabsan heerka maaliyadda ee Wakaaladda iyo in uu tilmaan ka baxsho;
- Dejinta barnaamijka dhoofinta waxyaabaha ay Wakaaladdu soo saarto ee ka bata isticmaalka gudaha;
- Go'aan ka gaaridda, isagoo haysta oggolaanshaha

Wasiirka, maalgelinta ay Wakaaladdu sameyneyso;
— Dejinta siyaasadda shaqo-siinta isagoo tixgelinaaya Sharciga, baahida iyo awoodda dhaqaale ee Wakaaladda;
— Xilalka kale ee Sharcigan gudihiisa lagu siiyey.

2. Guddiga Agaasinku wuxuu awood u leeyahay in uu Guddoomiyaha u wakiisho xil ka mid ah xilalka ku tilmaaman.

Qodobka 9aad

Shirka Guddiga Agaasinka

1. Guddigu wuxuu shirayaa ugu yaraan saddexdii biloodba mar.

2. Guddigu wuxuu kaloo yeelan karaa shirar aan caadi ahayn.

3. Guddiga waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda uu Shirku qabsoomayo.

4. Saddex meelood meel Xubnaha Guddigu waxa ay weydiisan karaan Guddiga Agaasinku in uu isugu yimaado shir aan caadi ahayn. Guddoomiyuhu waa in uu shirkaas qabtaa 21 maalmood gudahood laga billaabo taariikhda helitaanka codsiga.

5. Fadhiyada Guddigu waxa ay ku ansaxayaan marka ay ka soo qayb galaan aqlabiyadda Xubnuhu.

6. Qofka Guddiga Xubin ka ah oo ka tirsan Maamulka Wakaaladda xaq uma laha codbixin.

7. Go'aannadu waxa ay ku ansaxayaan cod hal dheeri Xubnaha Guddiga. Hase yeeshee haddii codadku ay isla ekaadaan waxaa la raacayaa dhinaca Guddoomiyuhu u codbixiyo. Go'aannada la gaaray waa in iyagoo qoraal ah lagu gaarsiiyaa Xubnaha 10 maalmood gudahooda laga billaabo taariikhda la guddoonsaday.

8. Haddii Guddoomiyuhu uu maqnaado, waxaa shir-guddoomiye noqonaya Xubin ka tirsan Guddiga

Agaasinka oo leh xaq codbixin oo Guddigu iska dhex doorto.

## Qodobka 10aad

## Guddoomiyaha

Guddoomiyaha Guddiga Agaasinka waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka, wuxuuna qabanayaa xilalka soo socda:

1. Isugu yeeridda iyo guddoominta shirarka Guddiga Agaasinka;

2. Masalaadda Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;

3. Masalaadda Wakaaladda dhinacyada saddexaad;

4. La socodka iyo hubinta xaqiijinta himilooyinka Wakaaladda, go'aannada Guddiga Agaasinka iyo habsami u socodka hawlgalka Wakaaladda;

5. Hawlaha kale ee Guddiga Agaasinku u xilsaaro.

## Qodobka 11aad

## Maareeyaha Guud

1. Maareeyaha Guud waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka.

2. Maareeyaha Guud waa Madaxa fulinta hawlaha Wakaaladda wuxuuna masuul ka yahay maamulkeeda iyo arrimaha hawlmaalmeedkeeda isagoo raacaya Sharciga, go'aannada Guddiga Agaasinka iyo tilmaanta Wasiirka. Gaar ahaan wuxuu qabtaa xilalka soo socda;

— Xaqiijinta himilooyinka Wakaaladda iyo hoggaaminta hawlaheeda;
— Horumarinta wax soo saarka iyo kormeerka tayada tacabka;
— Horumarinta qorshaha tacabka iyo abaabulka iibka iyo suuqgaynta oo uu ku jiro dibed u dhoofinta;

— Dejinta hab qaybin shamiinto oo habboon;
— Soo hordhigga Guddiga Agaasinka miisaaniyadda ku talo galka iyo midda xisaabxirka;
— Haynta Buugagga Xisaabaha ee Wakaaladda;
— Hawlgelinta, maamulka iyo qiimeynta Shaqaalaha Wakaaladda.

## Qodobka 12aad

## Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulku waxa uu ka kooban yahay Xubnaha soo socda:

— Maareeyaha Guud;
— Maareeyaha Warshadda iyo
— Maareeyaha Lacagta iyo Maamulka.

## Qodobka 13aad

## Xilka Guddiga Maamulka

Guddiga Maamulku wuxuu kala taliyaa Maareeyaha Guud arrimaha soo socda:

— Dejinta habraaca iyo qorshaha arrimaha la xiriira Wakaa-la dhaqaalaha ee Wakaaladda, maaliyadda iyo maamulka ee Wakaaladda;
— Diyaarinta miisaaniyadda ku talo galka iyo xisaabxirka;
— Dejinta qorshaha hawlaha Wakaaladda iyo qiimeyntooda;
— Diyaarinta warbixinta muddada leh ee loo gudbinaayo Guddiga Agaasinka, kuna saabsan maaliyadda Wakaaladda;
— Dejinta qorshaha horumarinta wax soo saarka;
— Dejinta hababka lagu ilaaliyo laguna kormeero xi saabaha Wakaaladda iyo sicirka;
— Dersidda talooyinka la xiriira shaqo qorista iyo mushaarka shaqaalaha ee la hor dhigaayo Guddiga Agaasinka;
— Dersidda talooyinka ku saabsan ku talo galka hantida iyo maalgelinta Wakaaladda ee la hor dhigaayo Guddiga Agaasinka.

# QAYBTA SADDEXAAD

# HANTIDA

## Qodobka 14aad

### Rasumaalka Wakaaladda

Rasumaalka Wakaaladdu waxa uu ka kooban yahay:

1. Lacagta ay Dawladdu u qoondeysay in lagu wado hawlaha Wakaaladda iyo mashaariicdeeda.

2. Hantida guurtada ah iyo midda maguurtada ah ee Wakaaladda.

3. Dakhliga ka soo gala Wakaaladda hawlaheeda, barnaamijyadeeda, mashaariicdeeda iyo adeegyada ay qabato;

4. Deymanka Wakaaladdu ay qaadato.

5. Deeqaha iyo kaalmada Wakaaladdu ay ka hesho Dalka gudihiisa ama dibeddiisa.

## Qodobka 15aad

### Xisaabaha Wakaaladda

Wakaaladdu waxay ka furaneysaa Bankiyada xisaab ayadoo si cad u qeexeysa dhaqdhaqaaqa iyo habka socodsiinta xisaabaha. Wakaaladdu waxay kontorooleysaa xisaabahaasi iyadoo sugeysa in maaliyadda Wakaaladda loo isticmaalay danaha Wakaaladda keliya iyo in mar waliba buugagta xisaabaha si habboon looga shaqeeyo laguna socodsiiyey xisaabaha.

## Qodobka 16aad

### Miisaaniyadda

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa miisaaniyad u gaar ah. Sannad miisaaniyadeedka Wakaaladdu wuxuu billaabanayaa 1da Jennaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31ka Disember ee sannad walba.

2. Inta ka horreysa 1da Oktoobar, Maareeyaha Guud waa in uu soo diyaariyaa miisaaniyadda ku talo galka ee sannadka cusub wuxuuna u soo gudbinayaa

Guddiga Agaasinka.

3. Guddiga Agaasinku wuxuu go'aan ka gaara-yaa miisaaniyadda la soo hordhigay inta ka horreysa 15 Noofember.

4. Faa'iidooyinka saafiga ah oo ay Wakaaladdu hesho waxaa lagu qaybinayaa go'aan ka soo baxa Guddiga Agaasinka.

Qodobka 17aad

Xisaabxirka

1. Sannad kasta, ka horreysa 1da Abriile, Maareeyaha Guud wuxuu sameynayaa xisaabxirka miisaaniyadda sannadkii la soo dhaafay wuxuuna u gudbinayaa Guddiga Agaasinka.

2. Isla markaas Maareeyaha Guud wuxuu nuqul xisaab xirka ah u gudbinayaa Guddiga Hantidhowrka ee Wakaaladda.

3. Guddiga Hantidhowrku wuxuu xisaabxirka soo raacinayaa warbixin tifaftiran oo ku saabsan habsamida loo maamulay dakhliga iyo kharajka.

4. Haddii Guddiga Hantidhowrku uu isku khilaafo warbixinta, hantidhowre kasta wuxuu diyaarinayaa warbixin u gaar ah, warbixinnada oo idilna waxaa la hor dhigayaa Guddiga Agaasinka.

5. Guddiga Agaasinku, isagoo dhegestay warbixinnada hantidhowrka, wuxuu oggolaanayaa xisaabxirka.

Qodobka 18aad

Guddiga Hantidhowrka

1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Guddi Hantidhowr ah oo ka kooban Guddoomiye iyo laba xubnood.

2. Hantidhowrayaashu waa in ay ahaadaan khubaro ku xeel dheer xisaabaadka iyo maamulka waxaana magacaabaya Guddiga Agaasinka isagoo dhegeystay soo jeedinta Guddoomiyaha.

3. Xubnaha Guddiga Agaasinku kama mid noqon akraan Hantidhawrayaasha Wakaaladda.

4. Muddada xilka ee xubnaha Guddiga Hantidhawrka waa laba sano, dibna waa loo magacaabi karaa.

5. Hantidhawrayaashu waxay yeelanayaan gunno, waxaana qiimaheeda xaddidaya Guddiga Agaasinka.

Qodobka 19aad

Awoodda Hanti-dhawrka

1. Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga Hantidhawrka waxay aood u leeyihiin, waajir ahaan iyo mid midba, in ay daalacdaan diiwaannada xisaabaha Wakaaladda iyo qoraallada kale ee xisaabaha khuseeya.

2. Waxay kaloo awood u leeyihiin in ay weydiistaan caddeynta iyo wargelinta ay lagama maarmaan u arkaan.

3. Maamulka Wakaaladdu waa in uu u suurta geliyaa Hantidhawrayaasha gudashada xilkooda.

QEYBTA AFARAAD

QODOBBO GEBA-GEBO AH

Qodobka 20aad

Degaanka Warshadda

1. Dhulka Warshadda: waxaa Wakaaladda loogu deeqay dhulka ay ka dhiseyso Warshadda iyo guryaha Shaqaalaha.

2. Dhulka kaawooyinka: waxaa Wakaaladda loogu deeqay kaawooyinka laga qaadayo alaabta ceyriin ee lagu farsameynayo Warshadda.

3. Hawlaha adeegga: waxaa Wakaaladda loo oggolaaday in ay ka faa'iideysato dekadaha, jidadka iyo isgaarsiinta Qaranka iyadoo ugu isticmaaleysa danta hawlaheeda gaarka ah.

Qodobka 21aad

Haqabtirka Warshadda

Iyadoo u hoggaansameysa shuruucda iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaa Wakaaladda loo oggolaaday:

1. In ay u madax bannaanaato doorashada dhinac vada ay la geleyso heshiisyada gaacsi ee loogu keenayo makiinadaha, qalabka iyo alaabooyinka lagu socodsiiyo Warshadda Shamiintada.

2. In ay dibadda ka keensato dhammaan qalabka, makiinadaha, sheykabaalka iyo badeecooyinka farsameysan oo ay Wakaaladdu u baahan tahay.

3. Inay u madax bannaanaato dhaqdhaqaaqa qalabka iyo makiinadaha kor lagu xusay, Dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

Qodobka 22aad

Dhaqdhaqaaqa hantida guurtada ah

1. Wakaaladdu waxay awood u leedahay bixinta lacagaha ay ku yeeshaan mucaamishooda, sharikadaha wax rara, shaqaalaha shisheeye ee Wakaaladda u shaqeeyo iyo guud ahaan lacagaha lagu yeesho (gaar ahaan dib u bixinta dulsaarka amaahda, celinta amaahda kor ku xusan, bixinta kharajyada kaalmada farsamada). Sidoo kale Wakaaladdu waxay u madax bannaan tahay guddoonka lacagta soo geleysa ayadoo u hoggaansameysa sharciyada Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

2. Iyadoo lagu shaqaynayo Sharciyada u degsan ganacsiga dibedda iyo sarrifka lacagta adag, Wakaaladda waxaa awood loo siiyey in ay ka faa'iideysato heerka sarrifka ee u faa'iido roon, si ay:

— U celiso amaahda, dulsaarka iyo kharajyada la xiriira;

— U bixiso qiimaha qalabka, alaabta, adeegga iyo khid madaha rakibaadda qalabka.

Qodobka 23aad
Cashuur dhaafid

Wakaaladda waxaa laga dhaafayaa dhammaan cashuuraha Dawladda Dhexe oo ay ku jiraan cashuuraha furdooyinka ilaa muddo toddoba sano ah.

Qodobka 24aad

Habka ku meelgaarka ah ee soo dejinta qalabka

Waxay Wakaaladdu ka faa'iideysanaysaa habka ku meel gaarka ah ee soo dejinta qalabka iyo makiinadaha marka ay heshiis la gasho sharikado shaqo u qabanaya kaddibna la noqonaya qalabkooda ay ku shaqeeyeen.

Qodobka 25aad
Sicirka shamiintada

1. Sicirka shamiintada lagu suuq geynayo waxaa dejinaya Guddiga Agaasinka, ayadoo tixgelin la siinayo in ay Wakaaladdu hesho faa'iido caadi ah oo ka dhalata raasalmeelkeeda.

2. Wixii kharaj ku kordha tacab soo saarka Wakaaladda waxaa lagu kordhinayaa sicirka shamiintada, ayadoo la tixgelinaayo taabagalka dhaqaalaha Wakaaladda.

3. Marka ay Wakaaladdu daboosho baahida suuqa gudaha ee shamiitada tiro iyo tayaba, waxaa reeban in shamiinto dibedda laga keeno.

Qodobka 26aad
Xeer-nidaamiye

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye dhammeystiraya, nidaaminayana habsami u fulinta Sharcigan.

## Qodobka 27aad

## Burrin

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

## Qodobka 28aad

## Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Dec. 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharciga lambar 2, taariikh 1 Jen. 1986: Oggolaanshaha Miisaaniyadda Ku talo galka Dawladda ee Sanadka 1986.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyey in ay soo ururiso dakhliga iyo in ay bixiso kharajka ku qoran Miisaaniyadda halkan ku lifaaqan ayadoo la raacayo Xeerka, habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaadka iyo Hantida Dawladda.

Qod. 2aad

1. Isbeddelka guud ee miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan MADAXYADA MISAANIYADDA waxaa lagu soo saarayaa Sharci.

2. Kala wareejinta ku saabsan Madax-xigeennada isku madax ah waxaa awood loo siiyey Dawladda.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaada madax-xige waliba waxaa awood loo siiyey, Wasiirka Wasaarad waliba. Kala wareejinta ceynkan oo kale ee miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa awood loo siiyey Guddoomiyaha Maamulka Dawladda ee Gobol waliba.

Qod. 3aad

1. Miisaaniyadda loogu talo galay Mashruucyada horumarineed iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa oo keliya mashruuc horumarineed.

2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay in uu keyd ka dhigo, haddii loo baahdo, dhammaan ama qayb ka mid ah lacagta ku jirta

madax-xige waliba ee miisaaniyadda isagoo raacaya Sharciga.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1986 waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1 Jan. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maslax Maxamed Siyaad uu ku soo weydiistey arjiga taariikhdiisu aheyd 20.2.84 gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Liido qaabkiisuna yahay Rect. addimadiisu yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= mch. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 60

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 57

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 61

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo maalintii lagu soo daabaco buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 6 Mag. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 1

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Saciid eXrsi uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikhdu ahayd 20.2.1984, uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 62

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 59

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6 Mag. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 2

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Maxamed Siyaad uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikhdu ahayd 20.2.1984, uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis, qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 57

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 56

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 60

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6 Mag. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 3

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Kaasha Maxamed Kaatun uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikh-du ahayd 22.12.84, uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 27X13,50 kuna fadhiya 364,50/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid Yar

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo „

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Guriga Cabdisalaam.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 4

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ismaaciil Saciid Cosoble uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikh du ahayd 26.12.83 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir qaabkiisuna yahay Afar Gees Isle'eg, Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 2265

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 1489

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 5

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Cismaan Culusow uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikh du ahayd 20.1.82, uu ku soo weydiistay gabal dhul Daw ladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis qaabkiisuna yahay Trapezio Addimihiisuna yihiin (15+6).40 kuna fadhiya 420/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Guriga Sheekh C/dulle

Galbeed waxaa ka xiga: dhulkiisii hore

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/oose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 6

Doladda Hoose Ee Muqdisho
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xaawo Maxamed Warsame uu soo weydiistay k

Warsame uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho Maalintii taariikhdu ahayd 25.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Hodon qaabkiisuna yahay Rettangoolare Addimihiisuna yihiin 27x13 kuna fadhiya 351 M.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Nuur Caloolo iyo G. kale

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE
Maxamud Ca'bdi Cismaan.
Doladda Hoose Ee Muqdisho

J. 7

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Maxamud X. Muuse uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd j.2.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Cabdulcasiis qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya 600 Mdh.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galb d Waxaa ka xiga: Waddo

B a d i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Ras miga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE

Maxamud Cabdi Cismaan.

L. 8

Doladda Hoose Ee Muqdisho

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaale Roobie Xasan Maxamed uu soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hxse ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 28,1.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Yaaq Shiid qaabkiisuna yahay Afar Ges islaeg Addimihiisuna yihiin 20x20 kuna fadhiya 400 Mdh

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: W. Jubada Sare

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad leh

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE

Maxamud Ca'bdi Cismaan.

L. 9

Doladda Hoose Ee Muqdisho

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seynab X. Cilmi uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdihso maalintii taariikhdu ahayd 24.4.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley qaabkiisuna yahay Trebesiyo Addimihiisuna yihiin (19.80 19,80)x19,80 kuna fadhiya 392.04. Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Wadada C. Qalabka Sida

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul dad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1p Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE

Maxamud Cabdi Cismaan.

L. 10

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

Doladda Hoose Ee Muqdisho

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cadde Suufi Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee L/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 13,3,84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan qaabkiisuna yahay Rettangolo Addimihiisuna yihiin 12x12 kuna falhiya 144 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 17 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE
Maxamud Cabdi Cismaan.

L. 11

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shirkadda Dhisma ha Xamar uu soo qortay Arji waaxda dhulka rasmiga ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 17,7,83 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley qaabkiisuna yahay Afar Gees Aldimihiisuna yihiin 100x100 kuna fadhiya 10.000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 25-27 W.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 24/W.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta la gu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Hasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. Hoose

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 12

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulaahi Geelaale Warsame uu soo qortay Arji waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 3.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir qaabkiisuna yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 20x20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 679 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 676 B.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal waaxda dhulka rasmi ga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta la gu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Hasmiga ah.

Muqdisho, 12 Apr. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. Hoose
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 13